Siyaasadda JKF- ANSHAXA ARDAYDA NAAFONIMADA LEH

I. Anshaxa Ardayda Naafonimada leh

A. Marka laga reebo sida lagu diyaariyay siyaasaddan iyo sharciga gobolka iyo dowladda dhexe, ardayda naafonimada leh waa in ay ku khasbanaadaan Xeerka Anshaxa iyo Habdhaqanka Degmada Dugsiga iyo siyaasadihiisa iyo habraacyadiisa ee xukumaya anshaxa ardayda. Hawlwadeenka dugsiga waxay ka saari karaan ardayga naafonimada leh ee jabiya xeerka habdhaqanka ardayga meelayntiisa ama meelaynteeda hadda la jooogo waxayna ku meelayn karaan xaalad waxbarasho badel ah oo ku meelgaar ah kuna habboon, xaalad kale, ama dugsi ka joojin, aan ka badnayn 10 maalmood oo kuwa dugsiga ah oo isku xiga, iyo ka saarisyo dheeraad ah oo aan ka badnayn 10 maalmood oo kuwa dugsiga ah oo isku xiga isla sannad dugsiyeedkaasi ee dhacdada gooniga ah ee dhaqan xumada inta ka saarisyadaada aysan ka samaysmin badelka meelaynta.

II. Qeexitaano

A. Ardayda Naafonimada leh. Ardayda naafonimada leh waxaa ka mid noqonaya ardayda lagu aqoonsaday in ay naafo yihiin Qodobka Sharciga Horumarinta Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafonimada leh (IDEA '04) ama Qaybta 504 ee Qodobka Sharciga Baxnaanista ee 1971, sida wax loogu badelay (Qaybta 504), ama ayadoo loo marayo hanaanka ay aasaastay Degmada Dugsiga. Ardayga waxaa lagu soo caddayn karaa dhawritaanada naafonimada ee hoos imaanaya IDEA '04 haddii la aqoonsan karo taasi kahor inta uusan falin dhaqan xumada u keentay anshaxa la soo jeediyay:

1. Waalidka ardayga uu ugu muujiyo khuseyn qoraal shaqaalaha maamulka iyo kormeeridda ee Degmada Dugsiga, ama ardayga macalinka, in ardayga uu u baahan yahay adeegyada waxbarashada gaarka ah; ama

2. Waalidka ardayga uu codsaday qiimeynta ardayga si loo go’aamiyo u-qalmitaanka adeegyada waxbarashada gaarka ah; ama

3. Macalinka ardayga ama hawlwadeenka kale ee Degmada Dugsiga uu si qeexan uga muujiyay khuseyn ku saabsan habka dabeecadda ee uu soo bandhigay ardayga si toos ah agaasimaha waxbarashada gaarka ah ama hawlwadeenka kormeeridda kale (ayadoo loo hoggaansamayo nidaamka u dirista waxbarashada gaarka ah ama oggaanshaha ilmaha ee Degmada Dugsiga aqoonsatay).

Ka-reebitaanka: Ardayga ma caddaysan karo midna dhawritaanada lagu qeexay siyaasaddan;

1. Haddii ardayga la qiimeeyay lana oggaaday in uusan lahayn naafonimo, ama haddii la go’aamiyay in qiimeyn aysan daruuri ahayn, iyo haddii waalidka (waalidiinta) ardayga la siiyay ogeysiiska go’aaminta u-qalmitaanka ama go'aaminta aanan lagu qiimeynaynin.

2. Waalidkan uusan oggolaan in ardayga loo qiimeeyo waxbarasho gaar ah. 3. Ardayga waxaa la go’aamiyay in uu u-qalmo waxbarashada gaarka ah, balse waalidka ayaa diiday adeegyada.

B. Dugsi ka joojinta. Ujeeddooyinka siyaasaddan, dugsi ka joojinta waxay ka dhigan tahay ka saarid hal mar ah oo aan ka badnayn toban (10) maalmood oo kuwa dugsiga ah ee isku xiga. Dugsi ka joojinta waxaa ka mid ah ka saarid kasta ee ardayga looga saarayo barnaamijka waxbarashada caadiga ah ee qayb maalinta dugsiga ah.

C. Dugsi Ka Joojinta Dugsiga Gudahiisa ah. Ujeeddooyinka siyaasaddan, dugsi ka joojinta dugsiga gudihiisa ah waa in qoraal ahaan loogu kaydiyaa talaabo anshax marin ahaan, balse waa in aan lagu xisaabin dhanka ka saaritaanka muddada gaaban ee 10 maalmood ee la isku daray inta ardayga uu yeelanayo fursadda uu kaga horumarayo manhajka waxbarashada guud, uu siiwadayo in uu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah iyo in uu kala qaybqaato ardayda kale ee faciisa ah ee aan naafada ahayn ee isku heerka meelaynta hadda la joogo ah.

D. Dugsi Ka Cayrin: Ujeeddada siyaasaddan, dugsi ka cayrinta waa in ay ka dhignaato nidaam waxqabad anshax marin la qabtay ayadoo la eegayo sharciyada gobolka si loo go'aamiyo cawaaqibta ku habboon ee habdhaqanka ardayga, taasi oo ka mid noqon karta ka saaridda barnaamijka waxbarashada caadiga ah ee ardayga in ka badan toban maalmood oo isku xiga, haddii habdhaqanka ardayga aanan loo arkin in uu caddayn u yahay naafonimadiisa/naafonimadeeda.

E. Badelaadda Meelaynta: Ujeeddada siyaasaddan, badelaadda meelaynta waa in ay ka dhignaato ka saaridda ardayga naafonimada leh meelaynta waxbarashada hadda la joogo ee ardayga haddii:

1. Ka saaridda ay ka badan tahay 10 maalmood oo kuwa dugsiga ah oo isku xiga; ama

2. Ardayga uu ku khasbanaaday ka saaridyo isku xigxiga ee ka kooban nidaam. Marka la go’aaminayo haddii nidaam uu jiro, cunsuradan soosocda ayaa la tixgalinayaa:

i. Ka saarisyada taxanaha ah isugeyntooda ay noqdaan in ka badan 10 maalmood oo kuwa dugsiga ah sannad dugsiyeed;

ii. Dabeecadda ardayga ee sababtay ka saaridda ay in badan isku mid yihiin arrin kasta; iyo

iii. Dhererka ka saarid kasta, isugeynta caddadka wakhtiga ardayga laga saaray, iyo isku dhowaanta ka saaridyada ee midba mid kale.

3. Degmada waa in ay go'aamiso ayadoo lagu saleynayo xaalad-ka-xaalad haddii nidaam ka saarisyada ay ka koobmaan badelaadda meelaynta.

F. Xaaladda Waxbarashada Badiilka ee Ku Meelgaarka ah(IAES): Ardayga waxaa laga yaabaa in laga saaro IAES sida ay go'aamiyeen kooxda IEP 45 maalmood oo kuwa dugsiga ah ayadoon la tixgalinin haddii dabeecadda la go'aamiyay iyo haddii kaleba in ay caddayn u tahay naafonimada ardayga haddii ardayga:

a) Uu ku wato ama ku haysto hub dugsiga, dhulka dugsiga ama hawsho dugsiga ee hoos imaanaysa awoodda wakaaladda waxbarashada dowladda dhexe ama dowladda hoose

b) Uu si ula-kac ah u haysto ama ay u isticmaasho daroogo sharci-daro ah ama iibiya ama uu raadiyo iibinta maado la ilaaliyo inta uu joogo dugsiga, dhulka dugsiga ama hawsho dugsiga ee hoos imaanaysa awoodda wakaaladda waxbarashada dowladda dhexe ama dowladda hoose; ama

c) Uu gaarsiiyo dhaawac jir ahaaneed aad halis u ah qof kale inta uu joogo dugsiga, dhismayaasha dugsiga ama hawsho dugsiga ee hoos imaanaysa awoodda wakaaladda waxbarashada dowladda dhexe ama dowladda hoose. Dhaawaca jir ahaaneed ee halista ah waxaa loo qeexaa sida dhaawac keena halista dhimasho badan, xanuun jir ahaaneed oo aad u daran, fool-xumayn qeexan ama dhaba-dheeraaday, ama

waayidda ama doorsanaanta waxqabadka xubin jirka ah, unug ama awoodda maskaxda oo daba-dheeraaday.

III. Dugsi Ka Joojinta

A. Dugsi ka joojinta arday naafada ah waxaa loo sameyn karaa hab isku mid ah iyo sababo la mid ah kuwa ardayda aan naafada ahayn muddo aanan ka badnayan 10 maalmood oo isku xiga.

B. Ardayga waxaa laga yaabaa in dugsiga laga joojiyo in ka badan hal dhacdo ee dhaqan xumada sannad dugsiyadeed haddii ka saarid kasta aysan ka badan 10 maalmood oo kuwa dugsiga ah iyo haddii ay badato ka koobna nidaamka. Maamuleyaasha dhismaha oo wada-tashi la yeelanaya maareeyahay xaaladda waxbarashada gaarka ah ee ardayga ay go'aaminya haddii isbadel meelayn ay dhacdo.

C. Ka joojinta dugsiga ardayda naafada ah ee ka badan 10 maalmood oo kuwa dugsiga ah ee isku xiga ama ka saarisyada oo dhacdooyin gooni ah ee habdhaqan xumada ee keentay badelka meelaynta waxay lagama maarmaan ka dhigaysaa dib-u eegista go'aanka caddaynta. Waxaa siidheer, waalidiinta waxaa la siinayaa ogeysiiska talaabada anshax marinta dhici doonto iyo ilaalinta habraaca.

D. Kadib marka ardayga naafada ah laga saaray meelayntiisa ama meelaynteeda hadda la joogo 10 maalmood oo kuwa dugsiga ah isla sannad dugsiyeedka, shaqaalaha dugsiga, oo wadatashi la yeelanaya maareynta xaaladda waxbarashada gaarka ah ee ardayga waxay go’aaminayaan heerka adeegyada loo baahan yahay, si awood loogu siiyo ardayga in ay sii wadaan in ay ka qaybgalaan manhajka waxbarashada guud, inkastoo goob kale, iyo horusocodka dhanka gaaridda yoolalka lagu soo bandhigay IEP ardayga.

IV. Dugsi Ka Cayrinta

A. Haddii dugsi ka cayrinta loo tixgaliyo arday naafonimo leh:

1. Waalidiinta waa in la ogeysiiyaa go’aanka lagu qaadayo talaabada iyo ilaalinta habraacyada waafaqsan sharciga goor aan ka dambayn taariikhda go’aankan la sameeyay; iyo

2. Hadeer, haddii ay suurtagal tahay, balse aan ka dambayn toban (10) maalmood oo kuwa dugsiga kadib marka ardayga

dugsiga laga joojiyay, kooxda IEP iyo shaqaalaha Degmada u-qalma waa in uu dib-u eegis ku sameeyaa

Xiriirka tooska ah ee u dhaxeeya naafonimada ardayga iyo dhaqankiisa ama dhaqankeeda dib-u

eegista caddaynta go’aanka.

V. Dib-u-eegista Go’aaminta Caddaynta

A. Dib-u-eegista Go’aaminta Caddaynta, maamulaha/qofka ku magacaaban, waalidka (waalidiinta) iyo xubnaha khuseeya ee kooxda IEP (sida ay go'aamiyeen waalidka iyo Degmada) waa in ay dib-u-eegaan:

a) dhammaan xogta khuseysa faylka ardayga,

b) IEP ardayga,

c) aragti ka bixin kasta ee ardayga, iyo

d) xog kastoo khuseysa ee uu bixiyay waaalidka (waalidiinta).

Kooxda waa in ay go’aamiso haddii:

1. Habdhaqanka su’aasha ku jira uu ahaa natiijada tooska ah ee guuldaraysadka dugsiga ee uu ku bixinayo adeegyada waxbarashada gaarka ah, adeegyada iyo gargaarka siyaadada ah, xeeladaha waxqabadka dabeecadda iyo/ama meelaynta ay u baahan yihiin IEP ardayga; ama

2. Habdhaqanka su’aasha ku jira waxaa keenay ama uu la leeyahy xiriirka badan ama tooska ah ee naafonimada.

Habdhaqanka ma aha caddaynta naafonimada ardayga haddii Kooxda IEP ay go’aamiso in xaaladaha labaduba 1 iyo 2 aanan laga soo bixin. Haddii dabeecadda ka dhashay jabinta xeerka dugsiga la go’aamiyay in aysan caddayn u ahayn naafonimada ardayga, mas'uuliyiinta dugsiga waxay u adeegsan karaan habraacyada anshax marinta khuseysa arday hab la mid ah iyo muddo la mid ah ayadoo habraacyada loo adeegsan doono arday aan naafonimada lahayn. Si kastaba, ardayga wuxuu sii wadayaa helitaanka adeegyada waxbarashada, si awood loogu siiyo ardayga in sii wato ka qaybgalidda manhajka waxbarashada guud, inkastoo goob kale, iyo horusocodka ku wajahan gaaritaanka yoolalka lagu soo bandhigay IEP ardayga, sida ay go’aamiyeen Kooxda IEP.

Habdhaqanka ma aha caddaynta naafonimada ardayga haddii Kooxda IEP ay go’aamiso in xaaladaha midkood qodobka 1 ama 2 aanan laga soo bixin. Haddii Kooxda IEP ay go’aamiso xaalada lagu sharcay qodobka 1 ee qaybtan laga soo baxay, dugsiga waa in uu qaado talaabooyin degdeg ah si loo xaliyo dhimannaanshahan. Haddii dabeecadda ka dhalatay jabinta xeerka dugsiga la go’aamiyay in ay caddayn u tahay naafonimada ardayga, dugsiga waa in ardayga ku celiyaan xaaladiisa/xaaladeeda waxbarashada hadda haddii:

a. Waalidka/mas’uulka iyo degmada ay oggolaadaan isbadelka meelaynta; ama

b. Degmada ay hesho badelaaddda meelaynta sida uu qabo sharciga; ama

c. Ardayga lagu meeleeyay Xaalad Waxbarasho Badiil ah ee Ku Meelgaarka ah, sida loogu sharcay hoos.

Ardayfa waa in uu helo, sida ku habboon, qiimeynta cilmiyaysan ee dabeecadda la xiriirta, iyo adeegyada waxqabadka dabeecadda la xiriira iyo dib u habaynta ee loo qaabeeyay si wax looga qabto xadgudubka dabeecadda sidaas awgeed dib uma dhaceyso. Haddii qiimeyta cilmiyaysan ee dabeecadda la xiriirta la dammeystiro kadibna qorshe la sameeyo kahor dhaqan xumada, dib-u-eegis ayaa lagu sameynayaa kadinna dib u habayn, sida wax looga qabto dabeecadda arrinta.

VI. Xaaladda Waxbarashada Badiilka ee Ku Meelgaarka ah

Hawl-wadeenada dugsiga waxaa laga yaabaa in ay ka saaraan arday xaaladda waxbarashada badiilka ee ku meelgaarka ah in aan ka badnayn 45 cisho ee kuwa maalmaha dugsiga ah ayadoo la tixgalinin haddii dabeecadda la go’aamiyay ay noqonayso caddaynta naafonimada ardayga, Kooxda IEP waxay go’aaminayaan xaaladda iyo adeegyada la bixinayo si awood loo siiyo ardayga si uu u siiwado ka qaybqaadashada manhajka waxbarashada guud iyo horusocodka ku wajahan gaaridda yoolalka lagu muujiyay IEP ardayga.

VII. Ardayda Loogu Aqoonsaday in ay Naafo yihiin Qaybta 504

Waxaan soosocda waa in loo adeegsado ardayda aanan u-qalmin sida “arday naafo ah” ujeeddooyinka IDEA ‘04, balse aanan u-qalmin sida “arday naafo ah” ujeeddooyinka Qaybta 504. Haddii Kooxda 504 ay go’aamiso in habdhaqanka uusan caddayn u ahayn naafonimada ardayga, mas’uuliyiinta dugsiga waxaa laga yaabaa in ay adeegsandaan habraacyada anshax marinta ee la xiriirta ardayga hab la mid ah iyo muddo la mid ah ayadoo habraacyada loo adeegsanayo ardayda aan naafada ahayn, oo ay ku jiraan dugsi ka joojinta iyo cayrinta haddii la adeegsan karo. Waxaa intaasi siidheer, qorista iyo dejinta barnaamijka waxbarashada waxaa loo bixinayaa heerka ee qorista iyo dejinta barnaamijka waxbarashada waxaa la siinayaa ardayda aan naafada ahayn ee aanan ku khasbanayan ansixinta Qaybta Kooxda 504. La ansixiyay: 16 Juun , 2000

La muraajaceyay: 21 Agoosto, 2008

TIXRAACYADA SHARCIGA:

C.R.S. 22-33-106(1)(c)

C.R.S 22-20-10 1 et seq. (Qodobka Waxbarashada Carruurta Aan Caadiga Ahayn)

20 U.S.C. 1401 et seq. (Xeerka Horumarinta Waxbarasho ee Shakhsiyaadka qaba cilladaha curyaannimo ee 2004)

TIXRAACYADA KALE EE LA ADEEGSAN KARO.:

JK Anshaxa Ardayga

JK-R Habraacyada Habdhaqanka iyo Anshax Baridda Ardeyga